

Warbixin ku socota waalidka iyo dhallinyarada kuna saabsan baaritaanka macluumaadka dhallinyarada (Ungdata-undersøkelsen)

Waxaa sanadkaan dugsiyada sare ee degmadaada/gobolkaaga ka dhici doona baaritaanka macluumaadka dhallinyarada. Baaritaanku dugsiyada ayuu ka dhacayaa gu'ga dhexdiisa. Ujeeddadu waa in la ogaado xaaladda dhallinyarada, iyo waxyaalaha ay qabtaan wakhtigooda firaaqada ah

Ujeeddada baaritaanka

- In ay dhallinyaradu helaan fursad ay siyaasiyiinta deegaanka iyo mas'uuliyiinta ugu gudbiyaan sida karriinka maanta yahay.
- In la helo aqoon loo adeegsan karo hawlaha degmada iyo gobolka ee sare loogu qaadayo xaaladda korriinka ee dhallinyarada.
- La helo cilmibaarid muddo dheer wax badan looga ogaado xaaladda korriinka dhallinyarada ee heer deegaan iyo heer qaran.

Maxaan kugu weydiin doonaa Macluumaadka dhallinyarada?

- Saaxiibbada, wakhtiga firaaqada la yahay iyo isticmaalka saxaafadda
- Qoys, iskool iyo bey'adda kuu dhow
- Caafimaad, ka-helitaan iyo tayada nololaha
- Dhibidda, gacan-qaadka iyo dadka dhibidda
- Jebinta xeerarka iyo isticmaalka maandooriyaha
- Jinsi, fasal iyo warbixinta qoyska (sida waddanka laga soo jeedo/asalka, xaaladda degaanka iyo heerka waxbarashada waalidka).

Sidee ayaa loo fuliyaa Macluumaadka dhallinyarada?

- Hal xisad ayaa loogu tala galay in baaritaanka laga jawaabo, qof weyn ayaana goobjoog ka ah.
- Baaritaanku wuxuu u dhacaa si elektaroonig ah ayada oo bogga jawaabta ee Macluumaadka dhallinyarada lagu gelayo fure aan horey loo sii aqoon oo hal mar shaqaynaya. Furaha laguma garan karo qofka jawaabay.
- Ardaydu waxay jawaabayaan ayaga oo istillaab saaraya foomka su'aalaha.
- Qofki doonaya waa loo akhrin karaa su'aalaha iyo jawaabaha foomka foomka su'aalaha. Laakiin markaas waa in qofku haystaa xargaha dhegaha la gashado ee wax lagu dhegaysto

Xor ayaa loo yahay in laga qaybqaato

- Dhallinyaradu iyagaa dooranaya inay ka qaybqaadanayaan iyo in kale.
- Dadka ka jawaabaya way ka boodi karaan su'aalaha aysan doonayn in ay ka jawaabaan,

haddii ay rabaanna ayaga oo dhexda maraya ayay isaga hari karaan.

- Waalidka ardayga ka yar 18 sano wuu diidi karaa inuu ilmihuuso ka qaybqaato. Markaas waa inuu waalidku macallinka xiriiriyaha ah/iskoolka u sheegaa ka hor intaan baaritaanku billaaban. Waalidka waxaa loo soo diri karaa foomka su'aalaha haddii ay la xiriiraan KORUS.

Ilaalinta macluumaadka qofka

- Si qarsoodi ah ayaa loo haynayaa jawaabaha oo dhan, qofka gaarka ahna lagama garan doono natiijada baaritaanka marka la daabaco.
- Macluumaadka qofka waxaa lagu kaydin doonaa meel ammaan ah. Marka ay shan sano ka soo wareegto dhammaadka baaritaanka ayaa macluumaadka laga dhigi doonaa kuwo aan la garan karin qofka dhiibay, oo waa la kaydin doonaa si loogu sii isticmaalo hawlaha horumarka- iyo cilmibaarista.
- Waxay ka-qaybqaatayaashu xaq u leeyihiin in ay arkaan waxyaalaha laga qoray, waxayna codsan karaan sixitaan iyo tirtirid. Uma badna in qofka xaqaaq loo fulin karo maaddaama aanan la soo qaadannin magac iyo macluumaad kale oo qofeed oo toos ah. Waxay ka-qaybqaatayaashu xaq u leeyihiin in ay ka hor yimaadaan oo cabasho u gudbiyaan Hay'adda Ilaalinta Macluumaadka Dadka (Datatilsynet).
- Sababta sharci ahaan oggolaanaysa adeegsiga macluumaadka qofka ayaa ah in Macluumaadka dhallinyaradu hayo dano bulsho oo muhiim ah, ayadoo hadafkuna yahay cilmibaaris.
- Adeegga ilaalinta macluumaadka Sikt (personvern) ayaa adeegsiga macluumaadka qofka u aragtay inuu waafaqsan yahay xeerka ilaalinta macluumaadka qofka.
- [Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan ilaalinta macluumaadka qofka iyo anshaxa cilmibaarista ka akhriso bogga internetka ee Macluumaadka dhallinyarada www.ungdata.no/personvern/](http://www.ungdata.no/personvern/)

Diyaargaraw

Adeegga caafimaadka ee dugsiyada ayuu u yahay ardaydii u baahata baaritaanka kaddib.

Mas'uulka baaritaanka

Baaritaanka waxaa fulinaya Machadka cilmibaarista samafalka NOVA ee OsloMet – jaamacadda magaalada weyn iyo xarunta aqoonta sakhradda ee gobolka (KORUS), ayaga oo shaqada u qabanaya degmada.

Xiriirka

Su'aalaha ku saabsan ilaalinta macluumaadka qofka:

Madaxa mashruuca NOVA kala xiriir:

ungdata@oslomet.no.

Waxaa kale oo aad la xiriiri kartaa Mas'uulka ilaalinta macluumaadka qofka ee OsloMet:

personvernombud@oslomet.no.

Warbixin intaan ka badan oo baaritaanka ku saabsan waxaad ka helaysaa bogga internetka ee Macluumaadka dhalinyarada www.ungdata.no/informasjon-til-ungdom-og-foresatte/

Warbixin intaan ka badan oo baaritaanka ku saabsan kala xiriir iskoolka ama KORUS-ka gobolkaaga.